

Macluumaad ku saabsan dabaasha iyo barashada badbaadinta ee iskuulka

Ku waalidka/masuuliyiinta

Waa maxay sababta ilmahaygu u baranayo dabaasha iyo badbaadinta?

Ujeedada baridu waa in ilmahaagu uu kalsooni isku qabo marka uu ku jiro, ag joogo ama dul joogo biyaha. Waa in ilmuhu noqdo qof dabaal yaqaan oo badbaadin kara naftiisa iyo dad kaleba.

Aqoonta dabaasha iyo badbaadinta ee ilmahaagu leeyahay waxay u sahlayaa inuu wakhtiga firaaqada ka qaybqaato nashaadka biyaha, sida dabaasha uu la samaynayo axsaabta iyo qaraabada ama hawlaha jimicsiga.

Muxuu ilmahaygu baranayaa?

Muddada uu ku jiro dugsiga hoose/dhexe waa in ilmuhu ka bilaabo la qabsiga biyaha ilaa uu gaadho heer uu yaqaano qaababka dabaasha ee lagu sameeyo biyaha korkooda iyo hoostooda, isagoo dabaalanaya masaafu dheer. Ilmuhu waxa uu baranayaa inuu caawimo codsado, hadana uu iskii is badbaadiyo, marka dambena barto inuu qof kale ka soo badbaadiyo biyaha. Arrintan waxay ku qorantahay manhajka maadada jimicsiga.

Laga bilaabo deyrta 2017 waxa iskuulka ku qasab ah inuu hubsado in ilmahaagu yaqaano dabaasha marka uu dhameeyo fasalka 4-aad.

Waa maxay aqoonta dabaashu?

Ilmaha waxa loo arkayaa qof yaqaana dabaasha marka uu ku dhexdhici karo biyo godan, kadibna caloosha ku dabaalan karo 100 mitir, inta uu dabaalanayo uu quusi karo oo gacmaha ku soo qaadi karo walax, uu hakan karo oo nasan karo 3 daqiiqo (intaasna ku sabeyn karo caloosha, hareerhiisa eegi karo, isrogi karo, ku sabeyn karo dhabarka); kadibna 100 mitir ku dabaalan karo dhabarka oo ku soo noqon karo berriga.

Sidee iskuulku u eegi doonaa in ilmahaygu yaqaano dabaasha?

Iskuulka waxa ku waajib ah inuu isticmaalo toddoba tijaabo oo qasab ah si loo eego in ilmuhu yaqaano dabaasha. Waxay ka tirsanyihiin waxa loo yaqaano «tijaabooyinka kartida ee qasabka ah». Tijaabooyinku waxay ku dhexjiraan barida dabaasha, oo ma noqon doonaan imtixaan hal mar la qaadayo.

Waxa lagu bilaabayaa tijaabooyinka ugu fudud kadibna waa la sii adkaynayaa. Tijaabada toddobaad ee ugu dambaysa ee qasabka ah ayaa lagu eegayaa in ilmahaagu yaqaano dabaasha.

Maxaan qaban karaa anigu?

Waalid/masuul ahaan waxa jira dhowr wax oo aad samayn kartid si ilmahaagu u barto dabaasha. U daa ilmaha inuu ku dhex cayaaro duushka (qubayska), saxanka qubayska iyo saxanka faroxalka, adoo ilaalinaya. Ilmaha bar in biyuhu kaga dhacaan wejiga, oo bar inuu xumbo ka soo afuufo afka iyo sanko (tusaale ahaan «hadda waxaynu iska dhigaynaa doonta mootoorka leh» ama «hadda aynu karino baradho»).

Carruurta qaar ayaa xilliga wakhtiga firaaqada ka qayb qaata kooras dabaal, aada hoolka dabaasha ama xeebta. Arrintaasi waxay qayb ka noqon kartaa in ilmuhu ku kalsoonaado biyaha marka dambena aqoon u yeesho dabaasha.

Waxa iyana wacan inaad bartaan waxa la sameeyo marka la joogo qolka beddelka dharka. In ilmuhu iskii u beddelan karo dharka, hagaajin karo alaabtiisa iyo muhiimada inuu si fiican u qubaysto oo isu nadiifin karo. Sidaas waxa ugu baaqanaya wakhti taasoo keenaysa inuu wakhti dheeraad ah u helo biyaha iyo barida dabaasha.

Sidee loo sameeya barida dabaasha iyo badbaadinta?

Iskuuladu qaabab kala duwan ayey u qorsheeyaan barida, laakiin waxa caadi ah in wiilasha iyo gabdhuhu wada dabaashaan, laakiin gooni u kala qubaystaan. Ardayda ugu yaryar waxa inta badan qolka beddelka dharka la jooga qof weyn oo la jinsi ah.

Waxa iyana caadi ah in qaybo ka mid ah barida lagu sameeyo dibedda. Arrintaas waxa loo samaynayaa si ilmuhu u bartaan qaabka ay si amaan ah u geli karaan biyaha, u ag joogi karaan iyo ugu dul socon karaan.

Waxa shuruud ah in markasta macalin waxbarasho soo qaatay goobjoog ka ahaado barida. Qofka ama dadka baraya carruurta waa inuu yaqaano dabaasha iyo badbaadinta. Iskuulka waxa ku waajib ah inay nidaam amaan oo wacan u sameeyaan barida dabaasha, markaa ilmahaaga si fiican ayaa loo ilaalinayaa marka uu ku jiro berkadda iyo marka uu joogo dibeddaba.

Xuquuqda ardayda

Haddii ilmaha, ama adiga/idinku waalid/masuul ahaan, dareensantihiin in isaga ama iyada la siinin barid dabaal iyo badbaadin oo ku filan waxa aad u dacwoon kartaan maamulaha iskuulka. Haddii aydaan dacwadaas ku gar helin waxa aad la xidhiidhi kartaan Xafiiska Gudoomiyaha Gobolka. Xafiiska Gudoomiyaha Gobolka ayaa kormeera dawladda hoose iyo iskuullada.

Yaa ka jawaabi kara su'aalaha?

La xidhiidh macalinka koowaad ee ardayga, maamulaha ama wakiilka Guddida Golaha Waalidka (FAU) ee iskuulkiina, haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan qaabka loo qorsheeyey barida ilmahaaga.